koobnid Bandhighid

Dugsigaaga 2
Hab- socodka is-diiwaangelinta..... 2
Foomka is-diiwaangelinta..... 2
Magacyada sharciyada ah..... 2
Adeegyada caafimaadka ardada..... 2
Ka hor iyo ka dib barnaamijyada dugsiga..... 2
Xaaladaha cudurka taabashada 2
Macluumaad degdeg ah..... 2
Injirta madaxa 2

Macluumaad Caafimaad 3

Baaritaanka caafimaadka 3
Tallaalka Iyo sharciga Oregon..... 3
Kalkaliyaha Dugsiga..... 3
Caawiyaha kalkaaliyaha Dugsiga..... 3
Maamulaha daawada dugsiga 3
Ka qaybgalka..... 4
Ka qaybgalka nidaamka wicitaanka..... 4
Is-diiwaangelin furan 4
Socotada..... 5
Bushkuleetooyin..... 5
Warbixinta horumarka ardeyga..... 5
Diiwaangelinta ardeyga iyo la noqosho..... 5
Hagaha macluumaadka 5
Macallin/xirfado Aqoonsiyo 5
Alaabada dugsiga..... 5
Caymiska ardeyga
Quraacda iyo qadada ee dugsiga Barnaamij..... 6
Xiritaanka dusgiga 6
Safarrada goob..... 6
Isticmaalka telefoonada..... 6
Hayawaanka dugsiga la keenayo 6
Helid iyo dhumid..... 6
Sharciga ogolaanshaha jeegga..... 6
Adeegyada ardeyga..... 6
Muusikada..... 6
Maktabada..... 6
Sheybaarka computerka..... 6
Waxbaarshada jirka 7
Latashi iyo hanuunin..... 7
Adeegyada waxbarashada gaarka ah
Iskaa-wax-uqabso dugsiyada 7
Barnaamij waxbarasho kale..... 7
Macluumaadka buklshada 7
Bulshada isticmaaleysa fududeynta dugsiga..... 7
Dhaqdhaqaaq laga mamnuucey lahaanshaha dugsiga 7
Is-diiwaangelinta vootada 8
Guddiga sare ee dugsiga
Guddiga miisaaniyadda
Isgaarsiinta dugsiga

Xuquuqda Ardeyga & Masuuliyadda

Maalgelinta turjumidda dokumentigan waxaa bixiyey deeq deeqsi ah ee Qorshaha Tallaabada ee Bariga Portland

Degmada Dugsiga David Douglas

Ken Richardson
Maamulaha

Candy Wallace
Kaaliyaha Maamulaha

Andy Long
Maamulaha Waxbarashada

BuuggaGacan-qabsiga Dugsiga Hoose

Loogu Talagaley Waalidiinta 2018-2019

Macluumaadka degmada ama waax gaar ah, wac xafiiska degmada tel. 503-252-2900.

Haddii caruurtu ku nooyihiin is-dacaayad,
Iygaga oo baranaya cambaareyn.
Haddii caruurtu ku noolyihiin cadawtinimo,
Iyaga baranaya dagaal.
Haddii caruurtu ku nooyihiin nacasnimo,
Iyaga baranaya iney xishoodaan.
Haddii caruurtu ku noolyihiin is-ceebeyn,

Waxay baranayaan iney dambiile yihiin
Haddii caruurta ku noolyihiin dulqaad,
Iyaga waxay baranayaan iney lahaadaan samir.
Haddii caruurtu ku noolyihiin dhirrigelin,

Iyaga waxay baranayaan iney lahaadaan isku kalsoonaan.
Haddii caruurtu ku noolyihiin is ammaan,
Iyaga waxay baranayaan la is maqsuudiyo.
Haddii caruurtu ay ku noolyihiin xaq-soor, Iyaga waxay baranayaan iney lahaadaan cadaalad.
Haddii caruurtu ay ku noolyihiin nabadgelyo,
Iyaga waxay baranayaan iney iimaan lahaadaan.
Haddii caruurtu ay ku noolyihiin ogolaansho,
Iyaga waxay baranayaan iney iyaga is-jeclaadaan.
Haddii caruurtu ay ku noolyihiin ogolaansho iyo saaxiibtinimo,
Iyaga waxay baranayaan iney ka raadiyaan adduunka jeceyl.

—Dorothy Law Nolte

◆Dugsigaaga

Dugsigaaga waa qayb ka mid ah Degmada David Douglas Lam. 40, oo ku yaal meel wanaagsan oo ku habboon ee magaalada Portland. Iyadoo weli ku taal magaalada, David Douglas ka go'aan degmada xagga dugsiyada dadweynaha.

Degmada Dugsiga David Douglas wuxuu daboolaa 12 miles oo wareeg ah ee guryaha qoyska, gurigaha la dego, xarunta dukaamada iyo ganasato yar-yar. Wuxuu u adeegaa bukshada dadka ugu yaraan 53,775.

Degmada Dugsiga David Douglas waxaa la sameeyey in 1959 xagga saddex degmo oo dugsi hoose ah—Gilbert, Powellhurst iyo Russellville iyo istagga dugsi sare ee degmada David Douglas.

Degmada hadda waxay ka mid tahay sagaal dugsiyo hoose ee darajada barbaarinta caruurta ilaa shan dugsiyo dhexe darajada lix ilaa sideed, hal dugsi sare darajada 9-12 iyo dugsi kale ee darajooyinka 9-12

Degmada waxay kalooo leedahay barnaamijyo dugsiga ka hor ee dugsiyo hoose loogu talagaley.

Xarunta bulshada ee xayawaanka biyaha ku nnol iyo gaacnta lagu sawiro wuxuu ku yaallaa dugsiyada sare.

Waxaan rajeyneynaa Inaad ka mid noqoto xubin fir-fricoon ee dugsigeenna bulshada iyo ka qaybqaadasho ee dhaqdhaqaaqyada la heli karo ee dadka degan agagaarka David Douglas.

Habsocodka Is-qoritaanka

Ardada cusub oo dhan waa iney iska-qoraandugsi hoose waxay ka qaybgelayaan intii aanan biloowin fasallada. Foomka is-qoritaanka waa in lagu dhammeystiraa xafiiska waqtiga Is-qoritaanka waalidka ama ilaaliyaha.

Caruurta waxaa loo baahanyahay Iney ahaadaan da'da Sebtambar 1 sidii loogu qori lahaa dugsiga barbaarinta caruurta yar-yar.. Sharciga Gobolka wuxuu doonayaa carurutu waa iney ahaadan lix sano jir ka hor Sabtambar 1 sidii ay u geli lahaayeen fasalka koowaad. Caddeynta taariikhda dhalashada iyo deganaan waa in la keenaa waqtiga is-qoritaanka ee dugsiga caruurta yar-yar ama darajada koowaad haddii kan u yahay waqtiga koowaad oo ardey dugsi ka qaybgelayo.

Ardada geleysa dugsiga markooda ugu horreeya waa iney lahaadaan imtixaanka jirka sharcigana ogolaanaya tallaalka (fiiri qaybta Loo "Baahanyahay Tallaalo") . Dugsi kasta, iyo badanaa takhaatiirta xafiisyada waxae leeyihiin foomka loo baahanyahay oo la rabo in la dhammeystiro takhtarka wax baaraya.

Foomka Is-Qoritaanka

Waa lagama maarmaan in dugsiyada ay leeyihiin lambar telefoon in waalidiinta lala xiririo haddii wax degdeg ah dhacaan. Lambar degdeg ah ee u dhow xaafadda, saxiib ama qaraabo iyada waa loo baahanyahay.

Fadlan ogow foomka dhexdiisa haddii cunugga uu alerjiya ku yahay shinni goostey, cunto gaar ah ama Inuu qaadanayo daawo gaar ah.

Waalidiinta/Ilaaliyaha ama qofka degdegga waa lala xiriiri doonaa haddii cunugga oo jirrado ama dhaawacmo. Haddii dugsiga uu la xiriiri waayo qof kasta, habka degdeg ah ee lagu xusey foomka is-qoritaanka ayaa la raaci doonaa.

Magacyada sharciga ah

Fomamka is-qoritaanka ardada waxaa lagu sameyn doonaa magaca sharciga ee dhalashadiisa la siiyey. Hase ahaateee, ardada waxay isticmaali karaan magac kale oo geddisasan haddii waalidiinta weydiistaan. Haddii ardey lagu magacaabo "neenaas", sida heer hoose, skip, Mickey wixii la mid ah, fadlan sheeg ku sheeg magaca sharciga la siiyey ee foomka is-qoritaanka.

◆Adeegyada caafimaadka ardada

In lagu taageero caafimaadka ardada, nabadgelyada, Iyo horumar akadeemiyada degmadeenna wuxuu siinayaa dugsiga adeegyada caafimaad iskaashatada Adeegyada Degmada waxbarashada Multnomah (MESD).

Qorshaha iyo siismada cunugaaga daawo gaar ah ama u baahan caafimaad maskaxeed (tusaale, cusurka sokorta, qalalka, ama walaaca dugsiga) **waa muhim si dhaqso leh** loo sheego shaqaalaha dugsiga iyo kalkaaliyaha caafimaad ee dugsiga.

.Waxa ku saabsan mid cusub ama dhibaato caafimaad Is-beddelaya oo wax u dhimaya waxbarashada ama dhibaato ama dhibaato .nabadgelyo dugsiga.

•Haddii cunugaaga wax daawo ah u socda oo dhibaato u keenaya jirkiisa.

.Markii cunugaaga uu leeyahay ama kordhinaya xaalada caafimaad oo u baahan si gaar ah loo xanaaneeyo inta uu dugsiga joogo.

Ka hor iyo ka dib barnaamijka dugsiga

Haddii cunugaaga uu ku qoranyahay "barnaamijka kahor iyo ka dib dugsiga" una baahan daawo intii waqtigan lagu jiro, daawo gaar ah iyo ogolaansho foom gaar ah ee xagga waalidka iyo/Ilaaliye ama takhtarka ayaa loo baahanyahay. Fiiri sharciga degmada ee maalmulka daawooyinka. La tasho barnaamija maamulkiisa la xiririra caafimaad gaar ah iyo nabadgelyo ee u baahan cunugaaga ee barnaamijkan.

Xaaladaha laysku daaran karo:

In la yareeyo faafinta xaaladaha laysku daaran karo ee dugsiyada, fadlan:

• U sheeg shaqaalaha xafiiska dugsiga ee kal-kaaliyaha caafimaadka haddii cunugaaga uu qabo cudur lays qaadsin karo sida bus-bus ama (hiiq-qunfac)
• Ha u dirin cunugaaga dugsiga haddii ay qabaan, cun-cun, qandho, shuban, ama matag, guriga ku hay 24 saacadood ka dib curuka ka dego.
• Dhowridda caafimaadka ardada ama dadka kale, cudurka qaarkood waxaa loo sheegi karaa qaybta caafimaadka sharciga (OAR 333-18-000). Waqtiyadan oo kale macluumaadka iyo wixii diiwaansan waxaa loo sheegi karaa dadweynaha maamulayaasha caafimaadka.

Macluumaad Degdegga

Dugsiga waa inuu lahaadaa hab uu kugu gaari karo haddii wax degdeg dhacaan. In la hubiyo in cunugaaga uu nabad qabo. Fadlan, u sheeg dugsiga si dhaqso ah is-beddelka shaqada iyo cinwaanka guriga iyo lambarrada tefoonka labadaba adiga iyo qofka lala xiriirayo degdeg ahaan.

Injirta madaxa

Waalidiinta waxaa lagu dhirri gelinayaa inay caruurta fiiriyaanan si joogta ah ee Injirta madaxa. Ardada oo injir nool ama qindhiciil lagama saarayo dugsiga laakiin waxaa loo ogolaanayaa iney ka joogaan dugsiga inta dhiman maalinta. Daaweynta injitrta waxaa loogu diri doonaa guriga kuwa qaba Injirta ama qindhiciil. Fdalan hubi sharciga degmada dugsiga caddeyn ahaan. Ardada oo dhan dugsiga wey ku noqon karaan markii daaaweynta uu

bilaabmay, ama in laga fiiriyey injir nool. Caddeynta waqtigan ma caawinayo qolka fasalka ama baaritaanka dugsiga-weynaha cabbir ahaan inuu yaraado Injirta madaxa kuwa caruurta da'da dugsiga.

Macluumad Caafimaad

• Macluuumad caafimaad waxaa lala qaybsan karaa shaqaalaha dugsiga oo ku saleysan markii macluumaad ku saabsan caafimadka waa lagama maarmaan cunugaaga "u baahan ogaansho" ogaadaan shaqaalaha dugsiga iney Ilaaliyaan Iyo iney ka jawaabsan baahida cunugaaga. Ku daridda, macluumaadkan iney u baahanyihiin qolada dugsiga Iney horumariyaann qorshe waxbarasho gaar ahaaneed oo loo maleynayo caafimadka uu u baahan yahay cunugaaga.

• Haddaan ogolaanin sii deynta macluumaadka caafimaadka, waxaa yaraanaya daryeelidda uu heli karo cunugaaga.

• Adigoo ogolaanaya sii deynta macluumaadka cafimaadka ee cunugaag, waxaad xaqiijineysaa in cunugaaga uu heli doono baahida degdegga ee daryeelka caafimaadka haddii loo baahdo.

• Waalidiinta/Ilaalada (iyo ardada xaqqa u lehtudents) waxey guud ahaan arki karaan diiwaanka cunugaaga waxay codsan karaan in la beddelo haddii ay aaminsan yihiin inuusan sax ahayn, marinn habaabin ama ka soo horjeeda xuquuqda ardeyga si gaar ahaaneed.

Baarintaan Caafimaad

Waalidiinta hadda waxaa laga codsanaa Inay keenaan laba caddeyn Ilaa 120 maalmood markii la qorey markii ardadooda 7 jir da'diisu yahay ama ka yar iyo bilaabidda dugsiga dadweynaha. Caddeymahan waa xagga takhtarka daryeelka caafimaadka iyo gobolka in ardeyga inuu lahaa baarista indhaha, iyo baarista ilkaha inta u dhexeysa 12 bilood na soo dhaaftey. Ku daridda, sharciga Oregon wuxuu shegayaa in baarista indhaha iyo maqalka in la sameeyo In la hubiyo caruurta indhahooda iyo maqalkooda ee baahida caafimaadka in dabagal lagu sameeyay. Kalkalaiyaha caafimaad waxay fiirineysaa baaritaanadan. Ballanta waxaa la mid ah baaritaanaada waxaa ka mid baarista maqalka ee barbaatrinta caruurta iyo fasalka koowaad Iyo baaritaan aragga ee fasallada koowaad Iyo saddexaad. waxaa lagu darey Maqalka: darajada

Aragga: Darajada dugsiga barbaarinta caruurta yar-yar, 1`,3,5 iyo 7
Intaas lagu darey baarista aragga, baarista yaraanshaha midabyada iyo aragtida kala geddisan waa la heli karaa. La xiriir kalkaaliyaha caafimaad ee dugsigaaga baaritaannadan.

Hadii aadan rabin in cunugaaga uu ka mid noqdo baaritaannadan adiga waa inaad kentaa dugsiga qoraal qoran sanad dugsiyeed kasta. Baarista jawaabtiisa ee maqalka iyo aragga dhammaantood waxaa loo dirayaa qoyska.

Tallaalada iyo Sharciga Oregon :

• Si loo Ilaaliyo caruuraha oo dhan, ardey kasta waa Inuu helaa tallaal joogta ah ee dugsiga diiwaansan ama daaweyn ama daaweyn la'aan laga reebey dugsiga. Ardada aan ku dhaqmin baahida tallaalka kama qayb geli karaan dugsiga waa na laga reebi doonaa gobolka xilsaaridda maalmaha (Arbacada 3rd Febraayo).

• Waa muhin in cunugaaga uu heysto tallaalka ugu dambeeya ee dugsiga. Fadlan fiiri xafiiska dugsiga haddii aad u baahantahay foomam

• Markii codsi qoraal ah uu waalidiinta/Ilaaliyeyaasha qoraan ee siideynta macluumaadka (foom waxaa laga heli karaa: http://www.mesd.k12.or.us/shs/hss/immunizations/immu1.pdf), the MESD Barnaamijka Tallaalka wuxuu siinayaa taariikhyada talaal ee kilinicaada haddii loo baahdo inuu caddeeyo taariikhda talaalka ee macaamiisha. Dadaalkan wuxuu kordhinayaa ka ilaalinta caruurta talaalka cudurka la isku daarto wuxuuna u kordhinaa qoyska iyo dugsiyada inay raacaan baahidda xilsaaridda tallaalka.

Kalkaaliyaha Dugsiga

Kalkaaliyaha Dugsiga waa kalkaaliye qoran (RN) iyo qofka furaha dhowraya ardada nabadgelyadooda iyo caafimadkooda.

Looma baahna ballamo ama ogolaansho gaar ah inay arkaan kalkalaiyaha. Ardada waa iney raacaan sharciyada dugsiga iney helaan warqado ay ku arkaan kalkaaliyaha. Saacadaha kalkalaiyaha dugsiga way kala geddisan karaan. Haddii kalkaaliyaha aan la heli karin, shaqalaha dugsiga oo loo tabaraey daryeelka koowaad wey caawini karaan caruurta ee xanuunsadey ama ku dhaawacmey dugsiga.

Kalkaaliyaha waxey u baahantahay macluumaad (tusaale ahaan, tariikhda caafimaadka, daaweynta, iyo daaweyn) si loo caawiyo ardada u baahan daaweyn gaar ah iyo baahida daaweynta madkaxda dugsiga. Kalkaaliyaha waxaa laga yaabaa Inay isticmaasho macluumaadkan si ay u tababarto shaqaalaha dugsiga sida ay u caawinaan cunugaaga. Sidii loo heli lahaa macluumaadkan, kalkaaliyaha waxaa laga yaabaa:

- La hadasho walidiinta, iyo/ama ardada
- La codsado in aad saxiixdo foom sii deyn macluumaad si loogu murmo baahida caafimaadka cunugaaga ee shaqaalaha dugsiga iyokhubarada daryeelka caafimaadka.
- Fiirista diiwaangelinta caafimaadka
- Qiimeynta meelaha jirka (tusaale: maqalka wadnaha, maqaarka, fiirista dhagaha).

Kalkaaliyahan waxay kugu caawini kartaa isticmaalka caafimadka wanaagsan (tusaale:cunto caafimaad leh, gacanta oo fiican loo dhaqo iyo khibradda bulshada).. Waxaad wici kartaa dugsiga haddii aad jeceshahey inaad la kyulanto kalkaaliyaha.

Caawiyaha Caafimaadka Dugsiga:

Lagu kordhiyey kalkaaliyaha

dugsiga, dugsiyada oo dhan waxay leeyihiin Caawiyaha Caafimadka Dugsiga (SHA) ee jooga si ay u caawiyaan ardada. Caawiyaha caafimaadka ma aha kalkaaliye caafimaad, laakiin wuxuu la shaqeeyaa tilmaanta kalkaliyaha

caafimaadka. Caawiyaha Caafimaadka wuxuu siinayaa daryeelka koowaad oo caadi ah, maamulka daawada, howsha diiwaangelinta talaalka, ku caawiya baarista caafimaadka, iyo keenidda daryeelka caafimaadka.

Maamulka Daaweynta ee Dugsiga

Kalkaaliyaha dugsiga waxey diyaarineysaa la tashi ku saabsan maamulka daaweynta in dugsiga lagu dhaqo dugsiga. Keliya daawo **oo loo baahanyahay in la siiyo waqtiga maalinta dugsiga oo lagu heynayo dugsiga. La muran takhtarkaaga ku saabsan waqtiyada malinta ee daawada loo bahanyahay. Haddi ay suurtowdo isku dey inmay diyaariso guriga lagu siin karo.** Kani waa nabdgelyo cunugaaga waana u fudud yahay. Sharciga Oregon, haddii daawo lagu siinayo dugsiga, waa in::

- Diyaari ogolaansho qoraal ah

(foomamka waxaa laga heli karaa dugsiga). Isbeddel kasta ee daawo waxaa looga baahanyahay waalidka/Ilaaliyaha inuu hagaajiyo foomka daawada waqtiga la beddelayo iyio inuu keeno warqadda daawada ee xagga takhtarka.

- Hubi daawooyinka oo dhan

(warqadda daawada iyo kuwa farmashiyaha) ee isaga oo asalkiisa ah iyo ku qoran magaca ardaeyga. (weydii farmashiyaha dhalo zaayid ah ee dugsiga markii warqadda daawada aad heleyso)

- **Hubi daawooyinka oo dhan waa inuu keenaa waalidka/Ilaaliyaha dugsiga ama qof da' ah oo mas'uul ah oo waalidka u xilsaarey.** Ardada Iyaga ma ceshan karaan daawo Ilaa ay ka gaaraan da' ku habboon xagga masuuliyadda, waxaa lo arkaa maamule iskiisa ah., uu leeyahay qoraal ogolaansho oo xagga waalidka ah, iyo ogolaanshaha maamulaha

dugsiga inuu sidaa sameeyo, ardada waxay qaadan karaan maalin keliya daawada uu isticmaalayo.

- Hubi in dugsiga uu heysto daawo ku

filan daawooyinka oo dhan ee cunugaaga u baahanyahay.

- Ka qaad daawada dugsiga markii

loo baahneyn. Daawooyinka oo dhan aan la qaadin dhammaadka sanadka waa la bur-burinaa.

KA QAYBGELITAAN

Ardey horumarkiisa dugsiga waa si toos ah waxay la xiriirtaa ka qaybgelitaankiisa. Ka qaybgelitaan joogta ah waa loo baahanyahay sharciga Oregon caruurta oo dhan da'doodu tahay 6 ilaa 18.

1. Cusdur daar ka qaybgelitaan

Baaqasho waa la raalli geli karaa maamulaha sababtoo ah:

- ardey xanuunsan
- dhibaato qoys degdeg ah

Ballan takhtar oo aan la ballami karin dugsiga ka dib

- Ogolaansho dabbaldeg diineed
- Maqnaansho mar hore la qorsheeyey

2. Maqnaansho marhore la qorsheeyey

Maqnaansho marhore la qorsheeyey waxaa loo baahanyahay digniin la horumariyey oo qoraal ah. macallin kasta ama maaule waa inuu siiyaa ogolaansho hore sidii ardey uu u heli lahaa maqnaansho la qorsheeyey. Ardada waxay heli karaan oo keliya wax shan maalmood aan ka badneyn ee maqnaanshaha la qorsheeyey inta sanad dugsiyeed lagu jiro.

3. Maqnaansho cudurdaar la'aan

Maqnaansho kasta oo an lahayn cudurdaar ama mid marhore la qorsheeyey noociisa waa maqnaansho aan curdaar lahayn. This waxaa ka mid ah goynta, erin, ku dhicid in la keeno cudutrdaar dhab ah, Ilaalinta wiilasha iyo gabdhaha yar-yar, wixii la mid ah.

4. Daahidda

Daahidda wuxuu ciriir gelinaaa habka waxbarashada ee fasalka.

- Ardada imaanaya dugsiga daahid waa Iney lahaadaan qoraal fasiraya xagga waalidkooda/Ilaaliyaha.
- Tallabo edbin ah ayaa laga yaabaa inuu ka dhasho xagga daahid joogta ah ee dugsiga iyo/ama shakhsiga fasallada.

5. Shaqo la Sameeyey

Waa masuuliyadda ardada inuu la xiriiro macallinka markii ardeyga dugsiga ku soo noqdo iyo inuu sameeyo diyaargarow inuu sameeyo shaqadii dhaaftey. Shaqada ay dhaaftey oo dhan cudurdaar ama cduur la'aan awgeed waa in mar kale la sameeyaa waqti go'an gudahiis oo macallinka siinayo sidii ardeyga oo u heli lahaa darajo.

6. Maqnaasho xad dhaaf ah

Ardada qaba maqnaansho dugsiga inuu sii wado oo taaban doono horumarka akadeemiyada iyo sameynta shaqada markii uu shaqo helo. Dugsiga wuxuu sameyn doono dadaal in waalidka lala socodsiiyo ku saabsan ka qaybgelitaanka ardadooda. Markii ardey uu maqnaado shan maalmood, shaqaale dugsiga waa inuu bilaabo Inuu warsado, la xiriiro waalid ama Ilaaliye, fiiro cudurdaarrada, inuu bilaabo Inuu qoro diiwaangelin ee weydiinta iyo wixii la mid ah. Gudbinta maqnaanshada xad dhaafka ah xattaa waxaa lala socodsiin karaa booliska Portland.

7. Xeerar kale

- Ardada dhaafaya dugsiga sabab kasta waa inuu qorid-bixitaan ka sameeyaa xafiiska dugsiga.
- Waalidiinta oo keliya, Ilaaliyaha sharciga ah ama wakiil la ogolaadey loo ogolyahay Inay ka qaadaan dugsiga ardey..
- Booqasho aan la ogoleyn booqanayo dhallinta oo aan dugsiga ku qorneyn lama ogola.

• Ardada waxaa la filayaa Iney guriga toos u aadaan dugsiga ka dib aan ka aheyn Iney ka qaybgelayaan jadwal

dhaqdhaqaaq ama macallinka weydiistey Inuu joogo. haddi ardey la weydiistey Inuu joogo dugsiga ka dib inuu dhammeystiro shaqo, caawinaya macallin ama sabab edbin ahaan, waxa lagu dadaali doonaa in lala socodiisyo waalidiinta/Ilaaliyaha.

8. Abaalmarinta Ka qaybgelid fiican

Ardada waxaa la filayaa inay lahaadaan ka qaybgelid fiican wxay xaq u yeeshaan Abaalmarinta ka Qaybgelidda Fiican marki joogta ahaayeen, waqti ah, iyo iney ka tegin goor hore dugsiga oo weli fasallada socda. Ma jiro ka reebitaan Abaalmarinta Ka Qaybgelidda Fiican.

9. Ku Dayashada Ka-Qaybgelidda Abaalmarinta

Ardada waxay xaq u leeyihiin Ku Dayashada Ka-Qaybgelidda Abaalmarinta haddii ay leeyihiin shan ama wax ka yar maqnaansho (ka mid ah daahidda) ee sanadka dugsiga.

Nidaamka Imaanshaha Wicid Soo Celin: Tilmaamaha iyo Waxyaalaha laga Filayo

Waxyaalaha laga Filayo Shaqalaha Dugsiga:

• Macallimiinta fasalka ay sameeyaan dadaal iney wargeliyaan imaanshaha saacadda 9:35 subaxnimo.

Weydii Waalidiinta/Ilaaliyaasha in waqtiga la socdsiiyaan macluumaddkooda la xiriira shir kasta IYO markii wax is beddelaan.

▬Daabac tilmaamahan jornaalka

dugsiga saddex bilood mar

Waxa Laga Filayo Shaqaalaha Xafiiska:

• Bilow wicidda waalidiiinta/Ilaaliyeyaasha unug kasta ee ka maqan fasalka 9:45 subaxnimo, ka ahayn walid/Ilaaliye oo mar hore wargeliyay dugsiga maqnaanshahiisa.

▬Wicitaanka waa in lagu sameeyaa

nidaamka soo socda, aan ka aheyn oo lagu siiyo amar kale waalidiin gaar ah::

1. Guri (lambarka wuxuu ka muuqanaa liiska maqnaanshaha oo yaqiinsan)
2. Waalidka cellfoonka (mar kasta, kan wuxuu ka dhigaa laba telefoon guri)
3. Waalidka meesha uu ka shqeeyo

▬Farriin u dhaaf markasta dhici karta

waqtigana qor.

▬Samee dadaal macquul ah inaad la

hadasho qof nool si loo xaqiijiyo Imaanshaha.

Waalid/Ilaaliye waxa laga filayo:

• Heyso macluumaad la hagaajiyey oo joogto ah

• Wac maalin kasta Dugsiga haddii cunugooda maqanyahay 9:15 subanximo.

▬Dugsiga ha ogaadaan ka hor haddii

cunuggooda uu leeyahay ballan ama haddii cunugga uu maqnaanayo waqti go'an.

Qoritaan Furan

Qoritaankla furan wuxuu ogolaanayaa ardey kasta ee David Douglas Dugsi Hoose ama dugsi dhexe inuu weydiisto ka qaybgelidda dugsi kasta ee degmadaoo boos bananaan la heli karo. Inkastoo dugsiyada David Douglas oo dhan wuxuu la kulmaa heer waxbarashosho sarreeysa wuxuuna siinayaa barnaamijyo isla ek, ardada qaarkood waxay heeli karaan in baahida waxbarashadooda si fiican loo addegsiiyo dugsi kale oo aan xaafadooda ku oolin. Araajida waa la tixgelin doonaa akademiyo ahaan ama daryeelka caruurta awgeed iyo midka keliya haddii dugsiga cusub aan xad dhhaf loo buuxin. Walidiintailaaliyaha ayaa ka masuul ah gaadiidkooda geynta iyo keenidda dugsiga la codsadey.

Socodlaha

Ardada dugsiga u soconaya waa inuu ilaaliyaa shaciyada nabadgelyada iyo inuu raaco tilmaamaha xagga ilaalinta nabadgelyada. Hogaamin ardey imaanshaha iyo ka tegidda dugsiga waxaa u xilsaaran degmada iyohababka edbinta. Ardada waa iney tusaan dhowridda sharafta ee dhismaha. Ardada nabadgelyadooda, waalidiinta waxaa lagu dhirrigelinaa in ardeyga ay la socdaan ardey kale ama ardada imaanshaha iyo ka tegitaanka dugsiga. Caruurtu oo dhan waa iney helaan tusaale taxadir leh ineyan u soo dhowaanin qof ajnabi ah.

Bushkuleetiyaasha

Ardada ku aadaya dugsiga bushkuleetiyaasha waa iney raacaan calamada trafikada iyo nabadgelyada dugsiga. Waa in bushkuleetiga ku qornaadaa Waaxda Booliska iyo in la xiro intii ay ku jiraan dugsiga. Birta madaxa lagu daboolo waa loo baahanyahay waana shrciga Golbolka.

◆ Macluumaad Dugsiga

Warbixinta Horumarka Ardeyga

Sanad dugsiyedka waxaa loo qaybiyey muddo laba sideed-iyo-toban usbuuc. Warbixinta horumarka darajooyinka K-5 waxaa la keemnayaa dhammaadka mid kasta muddada darajada.

Fadhiga macallinka-waalidinta/ilaliyaha waxaa la qabtaa laba jeer sanadkii. Macallinka waxaa laga yaabaa inuu la xiriiro waalidiinta fadhiyo dheeraad ah markasta markii loo baahdo.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa lagu dhiirrigelinayaa Iney wacaan dugsiga waqti aksta haddii wax su'aalo ah ay qabaan. Waalidiinta/Ilaaliyaha waa la soo dhoweynaa waxaana lagu dhiirri gelinaaa Iney booqdaan fasalllada. Hase ahaatee, haddii loo baahdo muran gaar ah oo macallinka lala yeesho loo baahdo, waa in la ballamiyaa ka hor si loogu hortago macallinka shaqadiisa oo kale iney carqalado gelin.

Diiwaanka Ardeyga iyo Ka Bixitaanka

Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha iyo ardada xaqa ay u leeyihiin waxay xaq u leeyihiin::

- Hubinta iyo fiirinta ardeyga waxbarashada xusuu-qorkiisa
- Codsi hagaajinta xusuus qorka waxbarashada ardeyga haddi la aaminsanyahay inuusan sax ahayn, marin habaabin, ama Iney ku xadgudbeen keliahaanshaha ardeyga ama xuquuq kale.
- Oogolaanshaha kashifaadda shaqsiga lagu garan karo macluumaadka ay ku jireen xusuusqorka

waxbarashada ardeyga, aan ka aheyn kaashifaadda oo la ogolaan karo waalidka la'aantiisa (tusaaleboolíska, adeegyada daryeelka caruurta, ama khubarada daryeelka caafimaadka, haddii kashifaadda dhowrayo caafimaad iyo nabadgelyo ee ardeyga ama shakhsiyaad kale).

- Iyadoo la raacayo OAR 581-021-0410, cabasho Waaxda Waxbarashada ee Dawladda Ameerika eedeyn hoos timaada 34 CFR§ 99.64 ku saabsan eedeybn u hogaansamin baahida sharciga federaalka.
- Hel koobi ku saabsan sharciga degmada ee xusuus qorka ardeyga.

Koobiyo Sharciga Degmada xusuus qorka Ardeyga waxaa laga heli karaa dugsiyada oo dhan. Fadlan la xiriir kaaliyaha xafiiska dugsiga ama maamulaha.

Degmada wuxuu diraa xusuus qorka waxbarashada la codsadey OAR 581-021-0250(1)(m) and (p) inta u dhexeysa 10 maalmood ee helidda codsiga.

Tusiye Macluumaad

Macluumaad ku saabsan ardada lama sii deyn karo Ilaa dugsiyada ay ka heystaan waalidka/Ilaaliyaha ogolaansho. Hase ahaatee, macluumaad lagu sheegey macluumaadka tusiyaha waxaa la siin karaa war-fidiyaha jornaalka oo dhacdo dugsiga wax ka sheegaya, PTA ama kuwa kale haddii maamulaha dugsiga uu hubiyo siideynta macluumaadkan oo kale oo faa'iido u ah ardada Iyo haddii waalidka uusan waxba ka qabin. Waalidiinta/ilaalieyyaasha ama ardada xaqqa uu u leeyahay wey diidi karaan in macluumaadkan oo kale lagu cayimo tusiyaha macluumaad

Tusiyaha Macluumaad waxaa ka mid ah:

- Magaca ardeyga. Taariikh iyo meesha uu ku dhashey
- Ka qaybgelidda sboortiga iyo dhaqdhaqaaq la yaqaan.
- Culeyska iyo sarreyn xubinta kooxda jimicsiga.

- Taariikhyada imaanshaha dugsiga
- Abaalmarin la heley
- Kuwa ugu dambeeya waxbarasho hor ama dugsi uu horey ugu qaybgeley.

Haddii aad diidantahay sii deynta mid kasta ama dhammaan waxyaalaha ku qoran hoosta tusiyaha macluumaadka, fadlan la socdsii maamulaha qoritaan ahaan. warqaddaada waxaa ;lagu lifaaqi doonaa ardadaada xusu qorkiisa waxaa laga reebi doonaa siideyn kasta macluumaad ku saabsan cunugaaga. Kan waa in la sameeyaa hal usbuuc gudahiisa qoritaanka ka dib ee ardeyga iyo sanad kasta ka dib.

XUSUUS: Sharciga Degmada wuxuu ka reebayaa dugsiyada iney sii deeyaan magacyada ardada shakhsi kasta ha ahaadee. ganacsi ama ajenzi tuugsi awgeed. Hase ahaatee, sharciga federaalka wxuuu codsanaa ciidamada cusub waxay heli karaan magacyada, cinwaannada iyo liiska telefoonnada ardada sare. Sharciga degmada wuxuu kaloo diidayaa dugsi ama degmo wax adeeg ama alaab la ayido. Qof kasta oo qaba su'aalo ku saabsan sharciga xusuus qorka ardey, u yeer maamulaha, ama xafiiska degmada, telefoon 503-252-2900.

Macallin/ Xirfad leh Aqoonsiga

Waalid/ilaaliye ahaan ee ardey ku jira David Douglas Dugsiga Dadweynaha lagu taageeraayo maaliyadda federaalka qaybta 1, sharciga cusub ee federaalka wuxuu kuu ogolaanayaa Inaad weydiiso macluumaad gaar ah ku saabsan macallinka fasalka ee cunugaagaa, iyo degmada waxaa laga codsanaa iney ku siiyaan macluumaadkan waqti go'an, haddii aad weydiisato.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxay weydiisan karaan macluumaad ku ssabsan xirfad aqoonsiga ee macallimiinta fasalka. Kan waxaa ka mid noqon kara macallinka shahaadadiisa ee darajada waxbaraddiisa ama macallinka haddii uu wax barayo degdegsiimo ahaan ama heer xirfad leh.
Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxay weydiin karaan shahaadada sare iyo shahaadooyin kale ee macallinka uu heysto iyo waxyaalaha uu barayo, haddii uu jiro, ee shahaado ama darajo sare.
Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxay kaloo ogaan karaan haddii cunuggooda adeegga laga siinayo dad xirfad leh (kaaliye), haddii sidaas ay tahay, xirfadahooda.
aMacluumaadkan waxaa lagu siin doonaa waqto go'an.

Alaabada Dugsiga

Liiska alaabada dugsiga beddelkeeda, ardey kasta waxaa la weydiiyey inuu keeno $20.00 si shaqaalaha dugsiga iney iibiyaan alaabada laga maarmaanka ah ee dugsiga. Ardada waa iney keenaan kharajka alaabta usbuuca ugu horeeey ee dugsiga ama ku noqoshada Habeenka Dugsiga. Janaayo 1 ka dib kharajka alabta waa la dimi doonaa $10.00 ee ardada is-diiwann gelnaya ee marka ugu horreysa dusiga DDS. Fadlan la xiriir dugsiga xafiiska si loogu hadlo dhibka lacag yarida shakhsiga iyo bixinta.

Ceymiska Ardeyga

Degmada Dugsiga David Douglas ma qaado ceymis ardada lagu ilaaliyo. Macaash ahaan ee degmada. qoysaska caruurta da'da ee dugsiga, lacag yari shil ardey Iyo barnaamijka ceymiska

ilkaha waa la heli karaa. Ceymiska waa haddaad rabtid oo keliya waxaa loo bixinaa oo keliya adeeg ahaan. Tusaale ahaan haddii reerka uu heysto ceymis kale, dugsiga midda labaad.

Dhammaan xawaaladda ku saabsann ceymiska dugsiga waxaa qabta sharikadda ceymiska, ee ma aha xafiiska dugsiga. Hase ahaatee foomamaka dacwadaha waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga.

Quraacda Dugsiga iyo Barnaamijka Qadada

Barnaamijka qadada dugsiga wuxuu u adeegaa dhowr nooc barnaamijkam waxbaarshada. Kifaayada qadada duhurkii,, waxay gacan ka geysaneysaa feyoow-qabadka jirka ee ardeyga. Waxey sidoo kale soo bandhigeysa fursad caruruta in la cuno noocyo kala duwan oo cuntooyin ah. Quraacna waa la heli karaa dugsi kasta lacag la'aan.

Dugsi kasta wuxuu leeyahy qado aad u wanaagsan oo u adeegayo cuntooyin nafaqo leh. Qadada ardeyga iyo caano waxaa lagu xisaabayaa dugsi kasta oo lagu sameeyey computerka.Mararka qarkood keydsiga ayaa la sameyn karaa xisaabtooda usbuuc ahaan ama bil kasta iyo qado ama iibsashada caanaha waxaa laga jarayaa maalin kasta.
Deynta looma dheereenayo ardey kasta ama reer dhillitir diidmo ah. Qado qafiif ah waxaa la siinayaa adey ku uruurtey deynta.

Cunto qiimahiisa la yereeyey ama bilaash ah waa la siinayaa xaalado waalidiinta dhib ay ku tahay iney bixiyaan qiimaha cuntada. Codsiga ku saabsan qadooyinka waa in loo smeeyaa xafiiska dugsiga.

Xiritaanka Dugsiga

Hadii ay dhacdo in hawada aad u xunyahay carruurta lama qaadi karo ama iney ka qaybgelaan dugsiga nabadgelyo ahaan, degmada wuu xiri doonaa dugsiga malintaas. Xiritaanka dugsigfa waxaa la sheegi doonaa Inta u dexeysa 6:00 and 7:30 subaxnimo. dhammaan radiyeyaasha ugu waaweyn ee Portlanad ku yaalla iyo telefiishanka Fadlan ha wicin dugsiga.

Ha ku qaldamin David Douglas kan Portland dadweynaha.

Dugsiyada David Douglas waxaa laga yaabaa inuu dib u dhigo furitaanka dugsiga saacad ama laba saacadood markii xaaladaha hawada aan la hubin.
Furidda daahidda waa la sheegi doonaa sida dugsiga xiritaankiisa.

Furidda daahidda waxaa loola jeedaa basaska dugsiga wuxuu daahayaa hal ama laba saacadood jadwalkooda caddiga ah ka sokow.

Safarrada Dhul-Beereed

Fasallada waxay aadi karaan safar dhul-beereed oo la qorsheeye ujeeddo waxbarasho ahaan. Safarrada oo la aadayo xuduudaha degmada looma baahna waal;idka ogolaanshihiisa, hase ahaatee, waalidiinta waa loo sheegi doonaa safarka. Warqada codaneysa ogolaansho ee ardada Iney qaadanayaan safar dhul-beereed ka baxsan xuduudka degmada, iyo wixii

la xiriira macluumaad ku saabsan safarka waxaa loogu diri doonaa guriga safarka ka hor.

Icticmaalka telefoonnada

Ardada waa iney ka heystaan ogolaansho macallinkooda iney isticmaalaan telefoonka dugsiga. Telefoonnada waa koban yahay waxaana u diyaarsan keliya ujeedada xafiiska. Ardada waa ineyan keenin dugsiga cell telefoonka.

Xoolaha Dugsiga

Xoolagha lama keeni karo dugsiga ogolaansho ka hor xagga macallinka lagu mana qaadi karo baska dugsiga.

Waqtiyada badan eeyaha wuxuu u raaca caruurta dugsiga wxuuuna sii joogayaa dhulka lagu ciyaaro isagoo sugaya caruurta. Faraxsan ahaan orodka iyo qaylada ee waqtiyada ciyaaraha waxay u nioqon kartaa yididiilo Iyo qaniinyo. Jawaab ahaan dugsiga wuxuu isku deyaa milkiilaha eyga inuu meel dhigoey kasta sidaasi uu u noqon karo guriga., Haddii qofka iska leh aan go'aan ka gaari karin ama haddii eyga mar kasta uu u noqonayo goobta ciyaaraha, waxaa lagama maarmaan ah in lala xiriiro xafiiska xaafadda Ilalainta xoolaha.

Dhumid iyo Helid

Cunugaaga magaciisa waa inuu ku qornaa dharkiisa oo dhan, alaabada dugsiga, ama wixii kaloo uu leeyahay ee laga keeney guriga, ka dibna markii la helo oo loo celin karo milkiilaha.

Dugsiga wax masuuliyada ah uu qaadayo aan ka aheyn baridda masuuliyadda lahaanshaha iyo ixtiraam. Ardada waxa ardada.lagu dhiirigelinayaa iney fiiriyaan xafiiska alaabada dhumidda iyo helidda. Alaab kasta oo ay ardada helaan waa iney xafiiska geeyaan. Alaabada dharka ah ee aan la codssan, sanadka dhammaadkiisa dugsiga tabarruc ahaan waxaa loo geyn doonaa dukaamada xarunta degmada.

Sharciga Ogolaanshaha Jeegga

Degmada dugsigeenna wuxuu diyaariyey sharciga soo socda ee ogolaanshaha jeegaga iyo uruurinta jeegaga xun-xun. Jeeg la ogolaanayo nooca bixinta waa inuu ku mid ahaadaa magacaada oo dhan. cinwaan, iyo telefoon lambar. haddii ay dhacdo in jeegaaga la celiyo bixin la'aan. Waxaa laga ogaan karaa elektroonik ahaan qiimahiisa iyo obolka wax uu ogolyahay in la bixiyo. Haddii ay dhacdo in jeegaaga la soo celiyo ee bixin la'aan, jeeg marna lama ogolaan karo nooc lacag bixin ahaan inta sanad dugsiyeedka ka hartey. Nooc kale oo lacag bixin ah ayaa la isticmaali karaa intii la bixin lahaa jeeg (lacag caddaan, kaarka deynta, bixinta online).

Adeegyada Ardey

Muusiko

Ardada oo dhan, darajada K-5, waxay ka qaybgelayaan barnaamij guud ahaan ee muusik. Laga bilaabo darajada shanaad, ardada waxay dooran karaan iney ka qaybgalaan kooxo dugsigooda dhexe. Kooxda muusikada waxaa la siinayaa ardada darajada shanaad ka hor inta aan la bilaabin dugsiga hoose ee maalinta dugsiga.

Maktabad

Dugsi hoose kasta ee degmada wuxuu leeyahay maktabad aad loo buuxiyey iyo shaqaale ku haboon. Barnaamij maktabad la qorsheyey, waxaa la siinayaa ardada oo dhan. Khaibrad tixraacid oo la socda xirfad waxaa laga baranaa shaqaalaha maktabadda.

Laborati Computer

Dugsi hoose oo kasta wuxuu leeyahay laabka computer-ka iyo computer soconaya. Muddada sanadka, ardada waxay isticmaalayaan waqti ku filan ee waqtiga fasalka iyagoo baranaya asaaska computer-ka. Waxaa laga rajeynaa in ardada ay helaan xirfadaha lagama maarmaanka ah inay isticmaalaan computer iyagoo dhammeynaya shaqada dugsiga.

Dugsiyada hoose eed egmada hadda waxay awodo u leeyihiin la heli karo internet, macluumaad adduunka fidsan dadka isticmaalayauu u ogolaanayo iney la xiririaan adduunweynaha, uruurin xog barnaamij, iyo sameyn

baaris elektroonik ahaan. Email waxaa loo isticmaali karaa la xiriirka cunugaaga macallinkiisa ama maamulaha. Foomka ogolaanshaha shsrciga isticmaalidda iyo ogolaanshaha internetka waxaa loo diri doonaa guriga bilaabidda sanadka dugsiga.

Barashada Jir-Dhiska

Khabiir loo xilsaarey barashada jir-dhiska ee dhismaha Inuu baro ardada barnaamij isku-dhellitiran ee horumarka jirka-dhiska.

Waxaa loo baahan doonaa dhar gaar ah dha-dhaqaaqa iyo barashada jir-dhiska Iyo barnaamijka sboortiga. Fadlan iska hubi in cunugaaga magaciisa uu ku calaameysanyahay alaabadan.

La-Talin iyo Hanuunin

Ardada waxay leeyihiin adeegga latalin iyo hanuunin iyaga loo diyaariyey heerarka darajooyinka oo dhan. Ujeedada waa xallinta korosiimada xirfadaha, khibrad Is-dhexgal ah iyo ogaansho shakhsi ahaan. Lataliyeyaasha khibrad u leh ogaanshaha goor-hore ee dhibaatada dugsiga xallinta dugsiga. Waalidiinta, macallimiinta ama maamulaha waxay u diri karaan ardey lataliayaha dugsiga.

Bulsho iyo horumar qiiro leh wuxuu ka mid yahay barnaamijka caadiga ee dugsiga.

Adeegyada waxbaridda Gaar ah

Degmada waxay leedahay adeegyo ardada naafada ah kana mid ah waxbaridda naafooyinka, jirka naafooyinka, hadalka iyo luqada naafooyinka, iyo dareenka rabshooyinka. Waxbaridda guriga iyadana waa la heli karaa haddii awoodda jirka uu u ogolaan waayo Imaatinka dugsiga. Ardada haya naafada maskaxeed iyo jireed waxay ka heli karaan xagga Degmada Multnomah Adeegyo Waxbarashada ama degmo kale ama ajenziyada Gobolka.

BarnaamijkaWax baridda Gaarka ah ee degmada wuxuu ogolyahay tilmaamaha gaarka ah in la siiyo mid gaar ah iyo macallimiinta waxbaridda gaar ah ee fasallada guud ahaan. Markii ardeyga baahiddisa ku habboon, caawinnaad gaar ah ayaa la siin karaa xattaa haddii ardeyga uu leeyahay naafo la ogyahay ama aan la ogeyn.

Haddii waalid/ilaalo qof uu dareemo Isaga ama Iyada cunuggiisa uu qabo naafo, waalidka wxuuu bilaabi karaa inuu u gudbiyo iyo sii-wadidda in la helo meesha ku habboon: macallin, la-taliye, maamule, iyo adeegyada maaulaha ardeyga.

Adeegyada dhammaan ee waxbaridda gaarka ah oo ka mid ah imtixaanka iyo gaadiidka, meesha uu ku habboonyahay, ayaa la siin doonaa waalidiinta kharaj la'aan.

Macluumaad dfheeraad ah ku saabsan barnaamijyada gaarka ah ee waxbaridda, la hadal maamulahaaga ama maamulaha degmada ee adeegyuada ardada tel: 503-252-2900.

Sharciyada la beddeley awgeed, adeegyada badan ee la xiriira caafimaadka ee la siiyo ardadeenna ee haya naafooyin hadda laga yaabaa in nus laga maalgeliyo Caawinaad-Caafimaad markii ku habboontahaya. Helidda caawinaa ee ardadeenna xagga Caawinaad-Caafimaad wax uu dhibaato u keenayo qoyska ma aha awoodda helidda manafacaadka Caawinaad-Caafimaad.

Iskaa Wax-u-Qabo ee Dugsiga

Waalidiin/ilaaliye badan iyo kuwo kale waxey xiiseynayaan shaqada dugsiyada ee fasallada, maktabadda, maqaayadda dugsiga, meesha caruurtu ku ciyaaraan ama meel kasta oo loogu baahanyahay sida caawiyaha Iskaa wax-u-qabso ahaan. Dadkan waxa ay siinayaan adeeg qiimo leh ee dugsiga iyo ardada. Macluumaad la xiriria barnaamij waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga.

Barnaamij Waxbarashada kale

Dugsiga David Douglas School wuxuu siinayaan waxbarasho kale iyo adeeegyo waxbaarsho kale ee ardada loo tixgelinayo erinta, oo leh edeb xun ama dhibaatooyin ka qaybgalka ama dib uga bixid xagga dugsiga

Markasta mid ka mid ah xaaladahan oo kale uu jiro, degmada wuxuu la

socdsiin doonaa waalidiinta helitaanka barnaamijyada kale iyo howsha socota ee is-qoritaanka ardada mid kastoo ka mid ah. (ORS 339.250). Barnaamijyada Waxbaridda kale waa loo heli karaa ardada tixgelinta xaaladaha soo socda:

1. Ku dul dhacdo labaad ama dhacdo kasta oo ku xiga dhibaato daran ee anshax xumo inta u dhexeysa saddex sano
2. Markii degmada ay hesho a imaatinka ardada oo si goosgoos ah in ardeyga uusan ka faa'ideysan barnaamijka waxbarashada.
3. Markii degmada ay tixgelineyso erinta edebnimo ahaan oo kale
4. Markii ardeyga la eriyo iyadoo kla tixgelinayo qaybta saddex ee ORS 339.250
5. Markii ardeyga ama waalidka ardeyga ama ilaaiyaha ardeyga ee sharciga ah uu u sheego degmada ama ku talo jiro inuu dib uga baxo xagga barnaamijka sida uu siinayo sharciga

ORS 339.250 (7).
Xaaladaha mid ka mid ah ee kore, maamulaha ama qof u xilsaaran wuxuu u sheega ardeyga, waalidiinta, ama ilaaliyeyaasha helitaanka barnaamijyada kale iyo barnaamijka u qalma ardeyga habka barashada iyo baahidda waa la tixgelinaa, iyaga waa bilaash isticmaaliddiisa laakiin kharajka degmada ma aha.

◆Macluumaad Bulshada

Isticmaalka Bulshada ee Xarunta Dugsiga

Dhismaha iyo xarumaha Dugsiga wuxuu diyaar u yahay siticmaalidda bulshada (ujeedooyin ganacsi la'aan). Markasta isticmaalidda aan ciriir gelineynin barnaamijka waxbaridda ee loogu talagaley ardada. Qolooyinka daneynaya ee isticmaalidda xarumahaasi waxaa looga baahanyahay iney ka helaan ogolaansho xafiiska dugsiga. Kharaj ayaa lopo baahanyahay isticmaalidda xarunta. Shakhsiyaadka waxaa la filayaa iney nabadgelyo ahaadaan iyo waxaa kaloo la filayaaintii ay isticmaalayaan xarumaha dugsiga. Dugsiga banaankiisa waa xiranyahyay isticmaalidda laga bilaabo fiidkii Ilaa fijirka.

Dhaq-dhaqaaq laga mamnuucayo xarunta Dugsiga uu leeyahay

Dhaq-dhaqaaqyada soo socda lagama ogola degmo dugsi kasta uu leeyahay:

- Tartanka baabuurta, mootootyinka, iyo baabuurta kale kana mid ah sameynta Iyo/ama tartanka baaburuta yar-yar ama kuwo kale oo yaryar ee korontada ku socda.
- Dayuurada korontada ku socda ama baabuurta yar-yar.
- Eeyo, fardo ama xayawaan kale.
- Ciyaarta Goolfada iyo gamuun tuurid.
- Lahaansho iyo/ama isticmaalid khamriga ama daroogad
- Isticmalidda waxa lagu sameeyay tubaakada.

lahaansho hub iyo raaas.

Is-Qoritaanka Cod-Dhiibasho

Waxaa jira dhowr sababo sababta waalidiinta/Ilaaliyaha ay isku qorayaan iney codka dhiibtaan. Mid qoyska ka qaybgelaya howlaha demoqraadiyadda wuxay u dhigayaan caruurtooda muuqaal wanaagsan. Sabab kale oo ah waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxay ku caawini karaan inay go'aamiyaan nooca waxbarashada caruurta ay helayaan iyagoo codkooda ka dhiibanayaan dugsiga isbaheysiga xaaladaha iyo xubnaha guddiga ee dugsiga.Arjiyada is-qoritaanka cod bixinta waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga.

Mar hjadii aad is-qortid, waxaad u qalantaa inaad codkaada ka dhiibato dugsiga, degmada, gobolka iyo doorashada waddanka.

Guddiga Dugsiga

Guddiga Dugsiga David Douglas , waxaa loo sameeyaa toddoba wakiil oo la doortey xagga degmada oo dhan, wuxuu u bandhigaa sharciyada degmada Iyo shaqo siinta shaqaalaha iney u fuliyaan sidasi. Guddi waxay guud ahaan kulmaan khamiista labaad bil kasta. Fadhiyada waxaa lagu qabtaa 7-da fiidnimo Dugsiga Sare ee Konfurta Campus, 1500 SE 130th Avenue. Muwaadiniinta ee biulshada waxaa lagu dhirrigelinaa iney ka soo qaybgelaan.

Guddiga Miisaaniyadda

Guddiga miisaaniyadda, oo ka kooban xubinta guddiga iyo todoba muwaadin oo magacaabey guddiga, waxay dib u hubinayaan miisaaniaydda maamulka ay soo bandhigeen sanad kasta. Guddiga waxay sameynayaan qorsheyn iyo ogolaanayaan gebi ahaanba tirada miisaaniyadda.

Fadhiyada guddiga miisaaniyadda waxaa la qabtaa ma muddada xilliga gu'a. Fadhiyada waxaa lagu qabtaa Dugsiga Sare ee Koonfurta Campus, 1500 SE 130th Avenue.
Muwaadaniinta waa la soo dhoweynayaa ka qaybgalkooda Guddiga wuxuu kaloo u dhiibayaan fursadda iney ka faalloodaan miisaaniyadda la soo jeediyey. Wac Xafiiska Degmada, 503-252-2900, taariikhyada fadhiyada.

Isgaarsiinta Dugsiga

Dhismo kasta ee dugsiga wuxuu la xiriiraa waalidiinta si joogta ah xagga joornaalka, bulletiinka, e-mails, telefoon, iyo farriinta qoraalka iyo macluumad kale oo loogu dirayo ardada. Degmada wuxuu diraa macluumaad degaannada iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha mudfdada sanad-dugsiyeedka. macluumaadka ayaa la heli karaa websitka degmada: www.ddouglas.k12.or.us

Intaas waxaa dheer,dhaq-dhaqaaqa dugsiga iyo dhacdada waxaa laga sii daayaa raadiyaha gudaha dadka degan iyo telefiishanka iyo jornaalka *Oregonian*.

◆ Fursad Waxbarasho Siman

Qofna inuusan, oo ku dhisan dada, naafada, xaaladda guurka, asal waddan, jinsiyad ama galmada in lagu qaado takoorid ee xagga barnaamij waxbaarsho, ama dhaq-dhaqaaq maamul ama ay ogoladeen Maamulayaasha Guddiga.

Dugsiyada Bulshada ee David Douglas wuxuu xaqiijinaa ardada oo dhan ee naafooyinka da'dooda

5 ilaa 21 deggan meelaha ka qaybgalka waxay helayaan waxbarasho bulshadeed ee ku habboon bilaashna ah ee degaanka ugu yar ee xakameynta. Xuquuqda caruurta ee naafada ah iyo waalidiintooda waa ilaalin doonaa iyadoo la raacayo sharciyada gobolka iyo federaalka.

Degmada wuxuu siinayaa tilmaamo gaar ah oo ee baahida waxbarasho gaar ah loogu talagaley. Adeegyo caawinaad ee sixidda hadalka, aqrinta, iyo waxbaridda guriga waa la heli karaa.
Ardada u baahan akademiyada weyn ama ama daaweyn waxay heli karaan adeegyo xagga

Adeegga Waxbarasho ee Degmada Multnomah ama ama ajeenziyaalka gobolka. Dhammaan adeegyada waxbarashada gaarka ah oo ka mid ah imtixaanka iyo gaadiidka, meeshii loogu habboon waa la siin doonaa kharaj la'aan ee waalidiiinta.

Degmada waa iney ogaadaan iyo aqoonsadaan ardada qaba naafada. Haddii adiga, ama qof aad taqaanno, uu leeyahay cunug naafo ah oo u baahan waxbarasho gaar ah ama adeegyada la xiriira, waxaad bilaabi kartaa inaad soo gudbisid xagga dugsigaaga gudaha ama la xiriir iskuduwaha waafaqsan degmada(Maamulaha Adeegyada Ardada) telf: 503-261-8209.